

## **Barashada Caafimaadka jismiga iyo la dhaqanka bulshada**

**Barashada caafimaadka jismiga iyo la dhaqanka bulshada waxay ciyaalka ku baranayaan sida ay isu badalayaan oo koritaanka jismigoodu ay u kala duwa naanayaan, fikradahooda iyo khibradooda iyo waliba inay yihiin qayb ka mid ah komunitigooda. Waxayna noqonayaan dad waaweyn naftooda ku filan kuna kalsoon naftooda. Waxay kaloo baranayaan oo ay hormarinayaan sida cadaalada ay u shaqayso iyo akhlaaqda, sida uu dhaqankoodu u saamayn karo gudaha iyo dibada iyo waliba caalamka mashaakilka siyaasadeed ee ka jira. Waxay bartaan sida ay ooga qayb qaadan lahaayeen iskuulka iyo komunitiga wax yaabaha laga sameeyo. Markay caruurta ay korayaan intaysan noqon qof wayn waxay maraan marxalada qaagaarka waxayna ka helaan iskuulka hoose musaacada u gudbinaysa in ay aadaan iskuulka sare. Waxay baranayaan in ay doortaan wixii ku saabsan caafimaadkooda iyo biiada inay qaataan mas uuliyad dheeraad ah, kali nimo iyo isku qayb markay waxbaranayaan iyo inay ka hor tagaan in la buligareeyo oo la bahdilo.**

**Halkan St Mary's waxaan caruurta barnaa caafimaadka jismiga iyo la dhaqanka bulshada si ka mid ah qayb manhajka iskuulka dhan laga isticmaalo. Qayb kasta oo iskuulka ka mid ah waxaan caruurta ku dhiiro gelinaa inay ogaadaan qiimaha ay lee yihiin oo ayna ogaadaan qof waliba waxa uu ku fiican yahay iyo horimarka ay gaareen. Waxaa la baraa inay hadaf samaystaan si ay ugaaraan mustaqbal wanaagsan, kaas oo ay u maraa inay macluumaadka raadiyaan, kaalmo haday ubaahdaan waydiistaan iyo waliba doorasho wanaagsan inay samaystaan. Caruurta St Mary's dhigataa waxaan ku caawinaa inaan tusno falka ay sameeyan waxa ay kala kulmayaan iyaga iyo dadka kalaba, in dadka kale dareenkooda la ilaaliyo iskuna dayaan in ay**

**fahmaan qofka kale waxa uu ka hadlayo. Waxaan eegnaa oon ilaalinaa dhaqan xumida bulshada iyo falalka xun xun ee la sameeyo, sida in la is bahdilo, la is cunsiriyeeyo, markay qof qof tahay iyo markay kumunuti ahaan tahayba. Waxaan kaloo ilaalinaa haday kuwaas dhacaan sida looga hor tagi lahaa, loona raadsado kaalmayn.**